

## Isticmaalka ardayga taleefanka gacanta ee dugsiga dhexdiisa

### Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waaliidinta

#### Ka mamnuucida taleefanada gacanta dugsiyada sare ayaa hadda jira

Ka mamnuucida taleefanada gacanta dugsiyada sare, mamnuucii hadda wuu ka shaqeynayaa dugsiyada hoose dhexe ee dadweynaha ee NSW.

Mamnuuca wuxuu shaqeynayaa inta lagu jiro fasalka, wakhtiga bareega iyo qadada. Ardayda waxaa loo ogol yahay inay sitaan taleefanka intay usoo socdaan dugsiga ama ay ka imaanayaan.

Macalimiinta iyo maamulaha waxay sidoo kale u idmaan isticmaalka taleefanka gacanta ujeedooyin waxbarasho ama ka qayb ahaan hagaajinta waxbarashada ardayga iyo fayoaqabka.

Si loo taageero bilaabida mamnuucan, Wasaaradda Waxbarashada NSW waxay weydiisay dugsiyada inay kala tashadaan bulshadaha xaafada talaabooyin dhaqangelined oo fara badan.

Tallaabooyinkan waxaa ku jira:

**Demin iyo fageyn:** Taleefanda waa la demiyaa layskana fageeyaa (badannaana waxay ku jiraan boorsada dugsiga ee ardayga). Taleefanada lama isticmaalo intuu socdo maalin dugsiiyeedku.

**Taleefada waxay ku jiraan sanduuqyada:** Ardaydu ma sitaan taleefanada; waa in lagu xiraa sanduuqa inta lagu jiro maalin dugsiiyeedka.

**Boorsada taleefanka ee xiran:** Ardaydu waxay geliyaan taleefanadooda boorso birqabata ah loo xiray mana awoodaan inay isticmaalaan taleefanka inta lagu jiro maalin dugsiiyeedka. Boorsooyinka waxaa lagu furaa si birqabata leh marka maalin dugsiiyeedku dhammaato.

**Taleefanada waxaa lagu ururiyaa xafiiska hore:** Ardaydu waxay taleefankooda geliyaan xafiiska hore ee dugsiga bilowga maalinta dugsiga waxayna qaataan dhammaadka maalin dugsiiyeedka (ama markay ka baxayaan dhismaha dugsiga).

**Taleefanada la ururiyey bilowga casharka:** Taleefanada waa la ururiyaa waxaana keydiya macalinka casharku markuu bilowdo waxaana loo soo celiyaa ardayga marka casharka la gabagabeeyo iyo/ama isla marka ardaygu uu ka baxayo fasalka.

Bulshooyinka gaar ahaaneed ee dugsiga ayaa go'aansaday tallaabada ay ku dhaqmayaan ee ay ku dhaqan gelinayaan qorshaha.

#### Xiriirka ardayga ee xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta inta lagu jiro saacadaha dugsiga

Waxaa laga yaabaa inay jiraan wakhtiyo xannaaneeyayaasha ama waalidiintu u baahdaan inay la xiriiraan ardayda ama waalidku inta lagu jiro maalinta dugsiga. Xannaaneeyayaasha iyo waalidiintu waxay kala soo xiriiri karaan dugsiga xafiiska dugsiga sidoo kale ardaydu waxay awoodi doonaan inay kala xiriiraan waalidiinta ama xannaaneeyayaasha xafiiska dugsiga haddii ay degdeg tahay.

#### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka sii badan fadlan dugsiga wac. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiimahaaga, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 kuna weydiiso turjumaan luuqadaada ah.

Una usheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka ee aad dooneysid inaad wacdid xiriiriyahaana turjumaan soo gelin doona khadka si uu kaaga caawiyo wadhadalka. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.

